

Baaritaankaaga Dhibta waxaa la muraajacayn doonaa 3-5 maalmood oo shaqo gudahood marka la buuxiyo ka dib. Iyadoo loo fiirinayo jawaabahaaga, waxaa laga yaabaa in ballamahan soo socda laguu sameeyo.

Ballanta Caawiyaha Bulshada (Social Worker) baa laga yaabaa in laguu sameeyo marka ay jiraan baahiyoo la xiriira shaqada, dhaqaalaha, isbeddelka caymiska caafimaadka, ama qarashka asaasiga ah ee maalmeed.

Ballanta Hagaha Bukaanka baa laga yaabaa in laguu sameeyo marka ay jiraan cabashooyin ku saabsan gaadiidka, deegaanka, ama qarashak asaasiga ah ee maalmeed.

Ballanta La Taliyaha Dhaqaalaha baa laga yaabaa in laguu sameeyo marka ay jiraan cabashooyin ku saabsan caymiska, su'aalaha lacag bixinta iyo/ama su'aalaha qarash qaybsiga ama barnaamijyada deeqaha caawimaadda. Wuxaad sidoo kale wici kartaa Xarunteenna Xiriirka La Taliyaha Dhaqaalaha si aad ballan uga qabsato qaybta adeegga Deegaanka Kansarka. Wuxaad ka wici kartaa 507-284-2421/833-479-5483 (Bilaash ah).

Si aad ballan u joojisid wuxaad raacdaa qaabka ku qoran Warqadda Hagista Ballamaha Bukaanka.

Fadlan booqo [Cancer Education Blog \(Bogga Tacliinta Kansarka\)](#) ee ku yaalla Mayo Clinic Connect si aad wax ugaogaatid sida ay Xarunta Tacliinta Kansarka ee Qoyska Stephen iyo Barbara Slaggie ay bukaanka kansarka iyo dadka caawiya u siiso tacliin bilaash ah iyo taageero xarumaha Mayo Clinic oo idil.

Annagu waxaan halkaan u joognaa inaan ku caawinno. Waad ku mahadsantahay in aad daryeelkaaga Mayo Clinic ku aamintay.

Kooxdaada caafimaadka